الشبكة التقوي الآسلاميه

بسم الله الرحمن الرحيم

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على نبينا محمد وآله وصحبه أجمعين

Waxaan ku bilaabayaa maqaalkan oo ah mid aan uga digaynao walaalahayga soomaaliyeed inay booqdaan qolal badan oo ay maamulaan walaalaha soomaaliyeed kuna yaala aaladda paltalk, kuwaas oo lagu hadal hayo soo dhoweynta ciida sannadka cusub waxay ay ugu magac dareen.

Qolalkaas waxaa lagu hayaa wax aan Allaah subxaanahu watacaalaa raali ka ahayn, diinteenuna ay aanay banaynin, waxaana doonayaa inaan halkaan ku cadeeyo Aayaad ka mid Quraanka Kariimka iyo dhowr xadiith oo ka sugnaaday rasuulkeena calayhi salaatu wasalaam oo muujinaya khatarta ay leedahay in la sameeyo dabaaldega sannadka cusub ee kiristaanka.

Allaah swt wuxuu Suuratu Al Maa'idah, Aayada 51aad nagu yidhi:

قال تعالى ( يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا الْيَهُودَ وَالنَّصَارَى أَوْلِيَاءَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ مِنْكُمْ فَإِنَّهُ مِنْهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ).

Micnaha Aayaddu waa sidan [[ ***Kuwa xaqa rumeeyoow haka yeelanina Yuhuud iyo Nasaara sokeeye, Qaarkood waa sokeeyaha qaarka (Kale ) Cidii ka Sokeeye yeelata oo idinka mid ah wuxuu ka mid yahay iyaga, Eebe ma hanuuniyo qowmka daalimiinta ah*** ]] Al Maa'ida – Aayadda 51

Waxaa kale oo Allaah Subxaanahu Watacaalaa isla suuraddan noogu sheegayaa Aayadda 57aad:

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا الَّذِينَ اتَّخَذُوا دِينَكُمْ هُزُوًا وَلَعِبًا مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَالْكُفَّارَ أَوْلِيَاءَ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ

Micnaha Aayaddana waa sidatan [[ ***Kuwa xaqa rumeeyoow haka yeelanina kuwa ka yeeshay diinta jees jees iyo ciyaar oo ah kuwa ehlu kitaabka ah, idinkana horeeyey iyo gaaladda sokeeye, Kana Dhowrsadda Eebe hadaad tihiin Mu'miniin*** ]] Al Maa'ida, Aayadda 57

Aayadahaas waxa si toosa Allaah subxaanahu watacaalaa inoogu cadaynayaa in aan la raacaynin yuhuud iyo nasaara, kuwaas oo ka yeeshay diintooda cayaar iyo jees jees. Cidii raacda ama sokeeye ka dhigatana in Allaah swt aanu hanuuninaynin aanayna ka mid ahayn mu'miniinta.

Hadaan u baydhno dhinaca Axaadiiththa ka sugan Rasuulkeena calayhi salaatu wasalaam, Waxa uu Rasuulkeena calayhi salaatu wasalaan noogu sheegay xadiithka aad wada garanaysaan ee uu warinayo عبدالله بن عمر, aadna ke helaysid أبو داود ( Abi Daa'uud ) Raqamka 4031 in [[ ***Qofka qowm isu ekaysiiya inuu ka mid yahay iyaga*** ]]

قال النبي صلى الله عليه وسلم (من تشبه بقوم فهو منهم) رواه أبوداود

Hadaan eegno labada xadiith ee soo socda oo inoo bidhaamin doona qofka la yimaada wax aan diinteena ku sugnayn, waxa uu nabigeena calayhi salaatu wasalaam yidhi:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم (من أحدث في أمرنا هذا ما ليس منه فهو رد) أخرجه البخاري ومسلم وفي رواية لمسلم (من عمل عملا ليس عليه أمرنا فهو رد).

Labadda Xadiith ee kore oo labaduba ah axaadiith saxiix ah kana sugan rasuulkeena calayhi salaatu salaam waxay ina tusinayaan in diinteeda wixii aan ka mid ahayn qofkii la yimaada lagu celinayo. Ixtifaal iyo ciidna aan laga qaadanaynin ilaa diinteena meelaha ay na amartay mooyaane.

Waxa kale oo aan umadda soomaaliyeed ku baraarujinaynaa in rasuulkeena suuban calayhi salaatu wasaalaam uu yidhi, xadiithka macruufka ah ee uu warinayo Ibnu Cabaas RC " Waxaad raaci doontaan kuwii idinka horeeyey, taako taako iyo dhudhun dhudhun, xitaa haduu midkood galo god abeeso waad ka daba galaysaan "

عن ابن عبَّاس -رضيَ الله عنهُما-، عن النَّبي -صلَّى اللهُ عليه وسلَّم- أنه قال: «لَتركَبُنَّ سَنَنَ مَن كان قبلَكم شِبرًا بِشِبرٍ وذِراعًا بِذِراع، حتى لو أنَّ أحدَهُم دخلَ جُحرَ ضَبٍّ لدَخلتُم، وحتَّى لو أنَّ أحدَهُم جامَع امرأتَه بالطَّريقِ؛ لَفعلتُموهُ».

Walaalahayga muslimiinta ahoow maanta dhibta aan faraha kula jirno sow ma aha inaan kudayanayno kuwii naga horeeyey oo ahaa yuhuud iyo nasaaro, oo aad arkaysid in qolal badan oo soomaaliyeed oo ka furan aaladda paltalk aad ku arkaysid sannadka cusub soo dhowaada, muusig la tumayo iyo rag iyo dumar is dhexgalay oo aan waxba loogu aabo yeelaynin xuduudii sharciga ahaa ee Allaah swt noo dhigay.

Nabigeena Muxammed calayhi salaatu wasalaam markuu u yimid reer madiina oo lahaa labbo maalmood oo ay cayaaraan, waxa uu ku yidhi nabigu salawaatu laahi wasalaamuhu calayhi:

قد أبدلكم الله تعالى بهما خيراً منهما يوم الفطر والأضحى

Waxaa la idiinkugu badalay labadaas labbo ka Wanaagsan oo ah maalinta ciidul fidriga iyo ciidul adxaa.

Dhamaan Aayaatkaas cad cad iyo Axaadiithtaas Rasuulka calayhi salaatu wasalaam ka sugnaatay waxay ina tusinayaan inaanay asalkaba banaanayn in:

1 – LAGU DAYADO GAALADDA [ YUHUUD IYO NASAARA ]

2 – AAN LA SAMAYN KARIN XAFLAD KA BAXSAN TAN SHARCIGA AH EE ISLAAMKU NOO BANEEYEY OO AH LABADDA CIIDOOD – CIIDUL FIDRI IYO CIIDUL ADXA

Hadaba waxaan gaga gabadii odhanayaa in aan walaaluhu ku degdegin samaynta ixtifaalka ciidaha kiristaanka iyo in aan lagu caawiyin cidna samaynta ciiddaha gaaladda.

Waxaan Allaah Subxaanahu watacaalaa ka baryayaa in uu ii dambi dhaafo wax khalada hadaan halkaan ku qoran, wixii aan dhamaantood saxay waxay ka dugnaadeen Allaah subxaanahu watacaalaa iyo rasuulkiisa calayhi salaatu wasalaam, wixii aan khaldayna waxay ka yimaadeen naftayda naaqiska ah iyo shaydaan lugooyadiisa, waxana Allaah subxaanahu watacaalaa waydiisanayaa dambi dhaaf.

والله أعلم وصلى الله وسلم على نبينا محمد وآله وصحبه أجمعين

محمد ابراهيم ابو احمد